

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

**Arrimaha Muhiimka ah**

Xaaladd sugaanta cuntada ee dhammaan habnololeedyada Soomaaliya aayaan isbeddelin, in lagu qiyaasay 870,000 oo qof aaya ku jira xaalad Ba'naan ama Gurmad degdeg ah (IPC Wajiyada 3 iyo 4 sidey isugu xigaan), 72 boqolkiiba waa barakacayaasha ku baahsan 3.3 malyan oo qof aaya wali ku sugar xaalad Dhibanaan ah (IPC wajiga 2). Heerarka nafaqo yu kuu sii harsanaato dalka guud ahaan laga billaabo Bisha 10aad illaa 12aad, 2013 sida ay gta Caafimaadka (NXC). Xaaladda nafaqada aaya la filayaa inay xumaato habnololeedka halka habnololeedka Golis Bari iyo Barakacayaasha Baydhabo la filay inay soo kabsadaan. Laga yaabaa iney kasii darto koonfurta iyo bartamaha somaliya, ka dib markii hayadda (MSF) ay ka baxdey nabadqelyadooda oo xumaatey awigeed dhowr bilood ka hor.

Malawaalka hordhaca ah ayaa soo jeedinaya in guud ahaan waxsoosaarka firileyda (masago iyo galley) ee Deyrta 2013/14 uu ka hooseyn doono qiyaastii Deyrta caadiga koonfurta Soomaaliya. Taasoo aay ugu wacantahay qoyaan yari ku dhacaydha inta badan habnololeedyada ku tiirsan beeraha ee koonfurta bishii 10aad xilligii beeraha la beeranayay, kadibna aanu si fiican abuurkii u dhalan markalena dib loo beeray. Sadaasha waxaa loo filayaa inaanay isbeddelin inkastoo roobab wax ku ool ah la sadaalinayo Illaa toddobaadka 3aad ee bisha 11aad. Sidoo kale, daadadka aafeeyey Shabeellad Dhexe ee qararka Jabey ee webiga ugu wacantahay ay sababay in ku dhowaad 18 boqolkiiba beeraha waraabka ah ay biyo buuxiyaan. Masagada sida caadiga ah waxay noqotaa boqolkiiba 60 waxsoosaarka firileyda ee Deyrta ee koonfurta Soomaaliya. Gobolka Baay, oo soosaaraa in ka badan kala bar masagada Deyrta ee koonfurta, ayaa la filayaa masagada Deyrta caadi ku dhaw inay kasoo go'do. Laakiin, gobollada kale ee masago tacbatada (Bakool, Gedo, Hiiraan), masagada la heli doono aaya la filayaa inuu caadigii ka hooseeyo. Isla muddadaa, dhuulka galleyda laga tabco ee Shabeelle, Waxsoosaarka galleyda ayaa iyan la filayaa inuu ka hoos maro Deyrta caadiga. Sabbaha ugu weyni waa dhibaatooyin isbiirsadey oo ka dhacay Shabellada Dhexe sida fatahaadaha iyo colaadda ka aloosantey deegaannada webiga ee Jowhar iyo kordhinta beerashada sisinta oo ka faa'iido roon halkii laga beeri jiray galleyda ee Shabeellada Hoose. Labad gobolba waxay caadi ahaan soosaaraan saddex-meeloo labo-meel waasoosaarka Deyrta galleyda ee koonfurta Soomaaliya. Saadaasha waxsoosaarka masagada cad ee beer-xoolodhaqatada Waqooyigalbeed ayaa wanaagsan ka dib markii ay heshay roobabkii Karanta oo wanaagsan (Bisha 7aad-9aad 2013). Hase ahaatee, waxaa yar inta uu gobolkan ku biirinayo waxsoosaar sanadeedka badarka dalka ee Soomaaliya (14%) marka la bardhigo gobollada koonfurta (86%).

Duufaantii dhoweyd ee ku dhufatey waqooyibari Soomaaliya ayaa lagusoo warbixinayaa iney geysteen dhimasho dad iyo xoolaba waxeyna burburiiyeen dhismo iyo waddooyin. Duufaantu waxay saameysay xeebaha Waqooyibari oo kasoo baxay xaaladda ba'naanta sugnaanta cuntada hal sano ka hor. Dhibkan cusubi ayaa sababi k kara in degdeg sugnaanta cuntada ee dadka dhibaataadu saameysay u xumaato. Dhibka inta uu la'egyahay waxaa lagu ogaan doonaa kormeerka sugnaanta cuntada ee FSNAU iyo hawl-wadaagyadeeda bisha 12aad 2013. Guud ahaan bishii 10aad waxtarka roobabka aad ayay uga hooseeyeen heerka caadiga deegaannada xoolodhaqatada Gobollada Juba Iyo Gedo. Deegaannada xoolodhaqatada intooda kale, roobabkii Deyrta ee bishii 10aad 2013 iyo tobankii casho ee hore ee bishii 11aad 2013 ayaa si wanaagsan u da'ay waxayna sababeen in daaqii baxo kobciyeenna helitaanka biyaha. Guud ahaan, haynta xoolaha xoolodhaqatada saboolka ahi ayaa kahooseeyaa caadiga inta badan habnololeedyada xoolodhaqatada iyo beer-xoolodhaqatada, marka laga reebo geel-dhaqatada Jubada Hoose. Iminka, waxsoosaarka caanaha wuxuu u dhaxeeyaa caadiga ama ku dhow caadiga dalka intiisa badan waxaana la rajeynayaan inuu kordho iyadoo la filayo In xoolaha dhalaya ay kordhi doonaan laga billabo bisha 11aad 2013 Iyo wixii ka dambeeyaa.

Sicirka galleyda ayaa mujinaya hoos u dhac tan iyo bishii 7aad 2013, ka dib markii waxsoosaar ku dhow caadiga la goostey Gugii iyo Gu-dabadii Bilihi 8aad-9aad, 2013. Waxaa taa ka duwan, sicirka masagada ayaa muujinaya koror dhexdhexaad ah (10-20%) isla muddadaa uguna wacan tahay waxsoosaarkii masagada ee Guga oo caadigii ka hooseeyey. Sicirka badarka ayaa si dhexdhexaad ah u kordhay muddo sanad ah dhammaan gobollada dalka marka laga reebo gobollada Juba oo iyagu dhawaan ka faa'ideystay waxsoosaar Gu' oo aad u wanaagsanaa. Sicirka caanaha ayaa kordhay xilligii Xagaaga (Bilihi 7aad-9aad 2013), balse aad bay uga hooseeyaan bihii 10aad marka loo eego sannadkii lasoo dhaafay (bishii 10aad 2012) dhammaan deegaannad dalka intooda badan oo muujinaya oolutaanka oo kordhay. Tusaha Sicirka iibsadaha (TSI) ayaa si dhedhexaad ah u kacay Koonfurta ka dib markii sicirka masagada uu si dhexdhexaad ah u kacay, una dhigma 32 boqolkii TSI kharashka ugu yar ee nolosha.


Hayadda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga (UNHCR) ayaa ku qiyaastey 1.1 malyan oo qof Iney weeli ku barcsanyiihiin gudaha Soomaaliya. Waxay UNHCR ku warbixineysaa dhaqdhaqaq dad oo qiyaastii ah 28 000 qof inay dhacday saddexdii bilood ee lasoo dhaafay, intooda badanna ay ka dhacday gobollada koonfurta. Xaaladda nabadgelyada ayaa lagu wadaa inaaney degganeyn deegaannada koonfurta lyo bartamaha intooda badan illaa dhammaadka 2013 taasoo caqabab waarta ku noqon doonta dhaqdhaqaay hayadaha samafalka.

Xilliga Jilaal Qalallan			Roobka Guga			Xilliga Xagaaga Qalallan			Roobka Deyrta		
Jan 2013	Feb	Mar	Apr	May	Jun	Jul	Aug	Sept	Oct	Nov	Dec 2013
Xilligii Jilaalka oo goo hore dhammaaday; Roobabkii Guga oo si wanaagsan uga billowdey dalka intiisa badan; Sicirkii badarka ee suyuqada intooda badan oo iska degganaa rubici hore ee snadka 2013	Waxsoosaarkii badarka Guga ee Koonfurta oo ku dhow caadiga; Habnololeedyada intooda badan oo lagu sifeeyay Dhibbaanaa (IPC Wajiga 2) ka dib Gugii 2013	Xilligii Xagaaga oo qaboobaa; Roobabka Karanta oo caadi ahaa; fatahaado ka dhacay Shabellada Dhexe	Fatahaado gobollada koonfureed; Duufaanno ka dhacay xeebaha Waqooyi; Badarkii dib uga dhacay xilliga oo lagu goostay webiyada Koonfureed; Waxsoosaarka badarka Deyrta oo loo badinayo inuu caadiqa ka hooseyn doono								

# XOG-IFINTA QEYBAHA


## CIMILADA

**Khariidadda 1: Kala Duwanaanta Roobabka Bisha 10aad 2013 iyo Celceliska Muddada Dheer (mm)**




Source: TAMSAT

**Khariidadda 2: E-MODIS NDVI kaga Duwan yahay Celceliska Muddada Dheer (1<sup>da</sup>-10<sup>ka</sup> Bisha 10aad 2013)**



Source: NOAA/FEWS NET

**Khariidadda 3: Saadaasha Roobabka ee 11<sup>ka</sup>-19<sup>ka</sup> bisha 11aad 2013 (mm)Soosaare**



Source: NOAA, Climate Prediction Center

Xilliga roobabka ee Deyrtan 2013 (Bilaha 10aad-12aad) ayaa billowday horraantii bishii 10aad balse ku kala duwanaa marka loo eego awoodda, muddada iyo baaxadda dhulka uu helay dalka Guud ahaan. Roobab u dhexeeya fudeyd iyo dhedhexaad ayaa ka da'ay dalka intiisa badan bishii 10aad oo cabir ahaan gaadhsiisan inta u dhexeysa 10 iyo 75 milliimitir (mm). Roobabku waxay ku ahaayeen goosgoos gobollada Jubada Hoose/Dhexe, Bakool, qaybo ka mid ah Gedo, qeyb Hiiraan ah (Beletweyn) iyo qaybo ka mid gobollada Bartamaha (Hawd iyo Cadduun). U barbardhigga qiyaasta roobabkii da'ay bishii 10aad 2013 iyo qiyaasta celcelisk muddada dheer ee bisha 10aad (1983-2011) ayaa muujinaya guud ahaan in roobab wanaagsan ay heleen meelo badan oo dalka ka mid ah. Roob yari xoog leh ayaa ku cad dhul ballaaran oo gobollada Juba iyo Gedo ah (Khariidadda 1). Roobabka Karanta (Bilihii 7aad-9aad) ee Waqooyigalbeed ayaa xilligoo dhan ahaa fudeyd-dhedhexaad. Wuxuu inta dheer, roobab aan caadi ahayn oo fudeyd-dhedhexaad ah ayaa ka sii da'ayey bishii 10aad Waqooyigalbeed (Awdal, W.Galbeed iyo, qaybo gobollada Toghdeer iyo Sanaag ah).


Muddadaa, kacsanaan kulaalaha oo tabar daran oo ka dhacday waqooyi galbeed ee Badweyninta Indiya ayaa sababay in roobab dhedhexaad ah oo xooggan ay ka da'an Khalijika Cadan iyo qaybo ka mid ah waqooyi Soomaaliya. Roobabkan ayaa laga yaabaa iney sii socdaan tobanka casho ee dhexe ee bisha 11aad oo fatahaadi ka dhaco qaybo ka mid ah gobollada Bari iyo Nugaal. Shabellaha Dhexe, dacallada webiga oo si ballaaran u jabiyeey ayaa ku fatahay qaybo ka mid ah degmooyinka Jowhar iyo Balcad. Biyaha ka imanaya Shabellaha Dhexe (daadka Jowhar) ayaa kuuso siqaya Shabellaha Hoose lagana yaabo inay dulmaraan beeraha degmooyinka Afgooye iyo Wanlaweyn. Fatahaado yaryar ayaa sidoo kale ka dhacay koonfurta Jalalaqsi ee gobolka Hiiraan bishii 10aad. Roobab culus oo ka da'ay gobolka Gedo 10kii koowaad ee bishii 11aad ayaa sababay in webiga heerkisu kaco isla mar ahaantaana dhul-beereed ku fatahaan qararka webiga oo jaban awigeed.

Xaaladda daaqinta ayaa wanaagsan gobollada Bartamaha iyo Waqooyiga intooda badan, ka dib markii lagu cabiray Jaantuska kala Duwanaansha Daqaq la Caadeystay (JDDC) ee sawirka dayax gacmeedka, uguna wacantahay waxtarka roobabkii dhownaan da'ay. Waxaa ka duwan, daaq xumada ka muuqata deegaanka xoolodhaqtada ee gobollada Jubada Hoose, Gedo iyo Bakool, oo loo xaglinayo roob xumadii bishii 10aad (Khariidadda 2). Sida Nidaamka Saadaasha Caalamiga (NSC) ee saadaasha roobabka 7-maal mood ah (11<sup>ka</sup> illaa 19<sup>ka</sup> bisha 11aad, 2013) ay soosaarto Maamulka Badaha iyo Hawada Qaranka (NOAA) Xarunta Odoroska Cimillada, waxaa loo badinayaa in robab u dhexeeya fudeyd iyo dhedhexaad (10-70mm) ay heli doonaan meelo badan oo dalka ka mid ah. Laakiin, meelo ka mid ah Waqooyigalbeed iyo Koonfurta ayaa la odorosayaa inay heli doonaan roobab lixaad leh (Khariidadda 3).

## COLAADAHA SOKEEYE

Intii lagu guda jiray kal saddexaadka sanadda 2013 (Aug-Oct) shaqaaqooyin colaadeed sida qaraxyo bambooyin ismiidaamin, miinooyinka dhulka la geliyo, dilal qorshaysan, iyo iska-hormimaadyo hubaysan, ayaa ka sii socday gobollada koonfurta, gaar ahaan Muqdisho, Hiiraan, Gedo, Baay, Bakool iyo Jubbada Hoose. Inta badan dhacdooyinkan ayaa lala beegsaday saraakiil dowladeed iyo taageerayaashooda, halka dhowr ka mid ah shacabkana la dhaawacay amaba la dilay. Hawlgallo militari oo caalami ah (duqayn dayaaradeed) oo lala beegsaday maleeshiyoon ka soo hor jeeda dawladda ayaa la soo sheegay (Baraawe iyo Jilib oo ku yaalla Gobollada Shabeellada Hoose iyo Jubbada Dhexe, siday isugu xigaan) laakiinse lama soo sheegin dhibaatooyin soo gaaray shacabka. Colaado qabil oo kooban oo la xiriira dilal aanno (gobollada dhexe iyo Sool) iyo colado salka ku haya manaafacaad (inta badanna la xiriira dhul beereed) ayaa laga soo sheegay gobollada Shabeellada Dhexe iyo Hiiraan.

**Jaantuska 1: Barakaca Dadka Dalka oo Idil ee Billaha (Bisha 8aad-10aad 2013)**



Source: UNHCR <http://data.unhcr.org/horn-of-africa/country.php?id=197>

Hay'adda UNHCR ayaa qiyaastay in tiro dad ah oo gaaraya 28 000 ay ku barakaceen saddexdii bilood ee ugu dambaysay (bilaha 8aad-10aad ee 2013) gudaha Soomaaliya. Dib u soo noqoshoo qaxootiga Soomalida ee ku nool Keenya, Itoobiya, Sacuudi Caraabiya iyo Yaman ayaa la soo sheegay. Hayaanka isu-gudubka xudduudaha ayaa u dhigma 24 boqolkii (6 700 oo qof) tirada guud ee hayaanka xilliga xogtan la bixinayay, waxan ku xiga ka saaridda barakacayaasha ee guryaha dawladeed (21%), daadad (17%), iyo lumid hab-nololeedyo iyo amni-darro (10% midkiiba) [Jaantuska 1]. Barakaca intiisa badan ayaa waxa uu ka dhacay gobollada Banaadir, Jubbada Hoose, Gedo, Shabeelooinka iyo Baay.

Marka laga reebo baaba'a naf iyo maal, amni-darrida waxay sii wadday inay curyaamiso hawlahaa dalag-soo-saar ee Shabeellada Dhexe ayadoo ay u sabab yihii colaado qabil oo ku salaysan is-maandhaaf nacfi oo ka jira tuulooyinka Hiinka webiga ee degmada Jowhar. Intaa waxa sii dheer, hawlahaa tijaaro iyo suuqyada ee Koonfurta-Bartamaha oo xannibmay; tusaale habboonna uu yahay canshuurta lab-laaban ee la saaray alaabada ka timaadda dhulka ay dawladdu maamusho una gudubta dhulka ay maamulaan kooxaha dowladda ka soo horjeeda. Amni-darrida ayaa sidoo kale aafaysay gaarsinta gar-gaarka bani'adminimo, ayadoo arrinta ugu dambeysayna ay tahay hay'adda MSF (bishi 10aad 2013) oo ka baxday gobollada Koonfureed (sida Baay, Jubbada Dhexe). Weliba, ismaandhaaf qabaa'il oo ka jira gobollada Bartamaha iyo qaybo ka mid ah gobalka Sool ayaa sababay in isu-guur-guurka xoolo-dhaqatada uu xaddidmo. Amni-darrida ayaa u muuqata inay ka sii jiri doonto qaybo ka mid ah Koonfurta-Bartamaha ilaa tan iyo dhamaadka 2013 ayadoo ay hawlahaa militari (Dowladda Federaalka oo ay caawimayaan Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya) la filayo inay sii socon doonaan.

## BEERAHA

Bishi 10aad 2013, FSNAU waxay sameysay kormeer degdeg ah si ay u qiyaasto waxsoosaarkii dalagga ka dib dhacay xilligii Guga 2013 (ee gobollada Shabellaha Hoose/Dhexe, Gedo, Baay iyo Juba) iyo inay soo kormeeraan hawlahaa beershada Deyrt. Marka la eego natijjada kasoo baxdey kormeerkaas, in lagu qiyaasay 4050 tan oo badar ah, ooy ka mid yihii galley (2500 tan), sisin (1500 tan) iyo digir (50 tan) ayaa la goostay laga billabo bishii 9aad illaa horraantii bishii 10aad 2013. Galleyda la goostay waafaqdey saadaashii la sameeyay kormeerkii Guga 2013. Qiyaasaha Guga 2013 oo loo geeyay waxsoosaarkii dalaggii dib uga dhacay xilliga Guga ee gobollada sare ku xusan ayaa lagu soo koobay Shaxda 1 ee hoose.

**Shaxda 1: Waxsoosaarkii Guga 2013 (Guga oo lagu daray kuwii dib uga dhacay xilliga)**

Region	Gu 2013 Harvest in Tonnes	Gu 2013 as % of Gu Average for 1995-2012
L/ Shabelle	50 300	84%
Middle Juba	9 900	108%
Lower Juba	7 600	132%
Gedo	5 800	118%
Bay	33 200	94%

Waqqoyigalbeed, Wax soo saarka beeraha iyo guud ahaan waxsoosaarka badarka ee Gu-Karan ayaa laga yaabaa inuu ka sare maro sidii horey loo saadaaliyay. Waxaa middani u sabab ah waxtarka roobakii Karanta (dhamaadka bishii 7aad-9aad, 2013) oo wanaagsan. Qiyaasta waxsoosaarka oo dhameystiran waxaa le heli doonaa dhammadka bisha 12aad 2013/horraanta bisha 1aad 2014 ka dib marka ay soo dhameystirmaan kormeerka beeraha ee FSNAU.

Sida xogta gudaha dalka ka muuqata, waxsoosaarka badarka inuu ka hooseen doono sidii cadiga aheyd, gaar ahaan galleyda, ayaa filayaan goboolada galleyda soosaara ee Shabeelooinka. Sababaha ugu weyn waxaa lagu daraya: robabka oo xumaa bishii 10aad 2013, oo sababay beeritaanka oo yaraada iyo dhalashada abuurka oo xumaada; daadadka (Degmooyinka Jowhar iyo Balcad ee Shabellaha Dhexe) oo ku faatahay qiyaastii 8000 hektar (2500 hektar oo balku taagan yahay iyo 5500 hektar dhul beereed diyaarsan ah); sicirrada galleyda oo hooseeya ayaa

xoojiyey in la beerto sisin oo faa'iido badan (Shabellaha Hoose). Gobollada Juba, dad ayaa si ula kaca u jabiye qararka webiga si biyo u galaan dhasheekyada ka dibna ay beertaan galley iyo sisin deyrta ka dib. Roob xumiida bishii 10aad 2013 ka sokow, reer-webiga Hiiraan iyo Gedo ayaan aad u liidan maadaama waraabku hagaagsan yahay beerasho caadina ay scoto, inkastoo shidaalkan qaaliga ah ee matoorradu isticmaalayaan ay dhib ku tahay qoysaska saboolka ah.


Inkastoo dhown jeer oo dib u beerid ah oo isku xigxigta ay dhacday qoyaan la'aan awigeed bishii 10aad 2013, masago ku dhow caadiga ayaa la filaya gobilka Baay, oo ah gobolka ugu soosaarka badan koonfurta Soomaaliya. Fiiradani waxay ku saleysan tahay waxtarka roobabka ee bisha 11aad 2013 oo caadi ah iyo cayayaan badan oo kicin. Rajada waxsoosaarka masagada ee Shabelloynka ayaa iyana wanaagsan. Laakiin, waxsoosaar masago oo liita ayaa laga filaya gobilada Jubada Dhexe, Bakool, waqooyiga Gedo, beero-xoolodhaqtada Hiiraan (gaar ahaan degmada Beletweyn) uguna wacan tahay roob xumi. Gobollada aan soo sheegnay ayaa ku biiriya qiyastii 20-25 boqolkiiba wadarta waxsoosaarka masagada ee koonfurta Soomaaliya. Saddexdii bilood u dambeysay (bishii 8aad-10aad, 2013) sicirka galleyda ayaa muujiyey hoos u dhac suuqyada koonfurta, halka sicirka masagada uu wax yar kordhay deegaannada masago tacbatada. Waxaa u sabab ah isbeddelkan waxsoosaarkii Guga 2013 oo ka hooseeyey sidii caadiga ahayd iyo galleyda oo caadi ahayd. Isbarbardhig sanadeedka ayaa muujinaya in sicirka galleyda uu kordhay Shabelle (12%) iyo inuu hoos u dhacay Juba (21%), halka sicir sanadeedka masagada ee gobollada Masaggo Tacbatada (Baay, Bakool, Gedo, Hiiran) wax yar hoos u dhacay (6%). Sicirka masagada cad ee Waqooyigalbeed ayaa iyana ka muuqdaa koror intii u dhhexeysay Bilihi 7aad-10aad, 2013 (17%) sidoo kale marka loo eego 12-bilood ka hor (18%) [Jaantuska 2].

## XOOLAHAA

Xaaladda cawska, caleenta iyo biyaha ayaa caadi ah inta badan gobollada waqooyi, uguna wacantahay roobabkii Guga 2013 oo caadi am caadiga ka sarreeyay, Karantii oo daba dheeraatay iyo roobabka Deyrta 2013 oo ah kuwo ku dhow sidii caadiga ahayd ama ka sarreeya. Inkastoo roobabka bishii 10aad 2013 ay ahaayeen kuwo googoos ah oo liita meelo badan oo gobollada koonfurta ka mid ah, hadana cawska, caleenta iyo biyaha wey soo hagaageen marka laga reebo habnololeedka beer-xoolodhaqtada koonfureed ee Gedo. Cawska, caleenta iyo biyaha ayaa u dhexxeeya wax ka hooseeyaa dhedhexaad iyo wax dhexaad ah. Guurgurka xoolaha waa caadi dalka Guud ahaan.

Xaaladda dhaqnaanshaha xoolaha oo idil ayaa weli ku sugan ku dhawaad dhedhexaad ama ka sarreeya dhedhexaad (keenay 3-4 ama 5-dhibcood Aaladda Sawir ku Qiimeynta [ASQ] Dhaqnaanta xoolaha) dalka Intiisa badan ka dib markii xaaladda daaqa uu hagaagay. Waxaa ka duwan gobolka Gedo oo xaaladda dhaqnaanshaha xoolaha u yahay mid ka hooseeyaa caadiga ama caadi ah (ASQ 2-3). Lo'da iyo riyahii rimay xilliyadii Jilaalka iyo Guga (2013) waa sidey isugu xigaane, ayaa billaabay dhalmadii laaga billaabo bishii 9aad 2013 waxaana la filaya inuu sii kordho xilliga Deyrta 2013. Sidoo kale, kadimo geel ah ayaa la filaya Iney dhalaan xilliga Deyrta. Waxay sababtay waxsoosaarka caanaha inay noqdaan caadi ama ku dhow caadi, balse waxaa la rajeynaya inay sii fiicnaadaan laga billaabo bisha 11aad 2013 iyo wixii ka dambeeyaa. Sicirka xoolaha ayaa iyana sare u socda gobollada Hiiraan, Bartamaha iyo Waqooyiga intii u dhhexeysey bilihi 7aad-9aad 2013 uguna wacan tahay baahida weyn ee loo qabay xilligii Xajka iyo ciiddaha. Sicirka xoolaha ee koonfurta Soomaaliya ayaa isbeddello kala duwani ka muuqdaa, gaaraahaan riyaha, halka sicirka lo'da uu kordhay inta badan suuqyada koonfurta isla muddadaasi. Isbarbardhig sanadeedka sicirada xoolaha (lo'da, geela iyo ariga) ee suuqyada intooda badan deggan ama kordhaya (Jaantuska 3).


**Jaantuska 2: Taxanaha Sicirka Badarka Dalka ee Billaha ah**



Masago la Abuurayo, Saakow FSNAU, bishii 10aad, 2013

Xoolaha ayaa iyana ka muuqdaa koror intii u dhhexeysay Bilihi 7aad-10aad, 2013 (17%) sidoo kale marka loo eego 12-bilood ka hor (18%) [Jaantuska 2].

**Jaantuska 3: Taxanaha Sicirka Riyaha Dabaaxa ah ee Gobollada (SoSh/SLSH)**



Lo' Xaaladda Jidhkeedu soo Wanaagsanaaday, Bu'aale, FSNAU, Bishii 10aad, 2013

## SUUQYADA IYO GANACSIGA

Intii u dhaxaysay bilihii 7aad iyo 10aad ayaa Shilinka Soomaaliga (SoSh) ee suuqyda muhiimka ah ee koonfurta Soomaaliya uu in yar qiiimihisu hoos u dhacay marka loo eego Dollarka Maraykanka (USD). Dhamaadkii bisha 10aad, suuqyada gobolka Banaadir ayaa soo min-guuriyay 21 000 SoSh/USD, asagoo xoogaa uu qiiimihisu hoos uga dhacay heerkii bishii 7aad oo ahaa 10 240/USD. Qiiimaha ayaa ahaa mid xassiloon suuqyada Bartamaha iyo Waqooyiga-Bari. Tani ayaa waxa loo aanaynaya maalgashiga dhaqaale ee kordhay, gaar ahaan gobolka Banaadir. Intii u dhaxaysay bilihii 7aad iyo 10aad ee 2013, Shilinka Soomaalilaan (SISh) ayaa qiiimihisu in yar sare u kacay dhamaan suuqyada isticmaala SISh-ka oo ayna ugu wakan tahay doollarka ka yimaada dhoofka xoolaha oo suuqyada soo galay. Hase yeeshi, SISh-ga ayaa ahaa mid xassiloon tan iyo kal hore.

Qiiimaha maciishadda daruuriga ee la soo dhoofsho ee dhamaan suuqyada isticmaala SoSh-ka iyo SISh-ka sida naaftada, saliidda cunnada, iyo burka/daqiqida ee dhamaan suuqyada ayaa xasilloona maadaama ay cunno soo dejintu sii socotay qiiimaha cunnada ee duniduna uu xasillonnaam ababa hoos u dhacay. Hase yeeshi, qiiimaha badeecadahan ee goobaha ganaci ee Jubbooyinka qaarkood ayaa waxoogaa sare u kacay, sababaha ugu weyn-na ay yihiin sare kac ku yimid colaadaha iyo canshuuraha oo ay soo rogeen maamuladda maxall.

Isbaddal sanadeedka qiime ee la diiwaan gelyiy bisha 10aad ee 2013 ayaa muujinaya in qiiimaha badeecooyinka kor ku xusan ee suuqyada isticmaala Shilinka Soomaaliga uu si aad ah hoos ugu dhacay, arrintaasoo si ballaaran uga tarjumaysa shilinka sii xoogoobaya, awoodda dekadda Muqdisho oo sii ballaratay iyo qiiimaha caalamiga oo xassiloon. Isbaddalada qiime ee inta badan badeecooyinka ayaa sida guud la jaan-qaadayay isbaddalada qiiimaha heerka caalami.

Intii lagu guda jiray bilihii 7aad-10aad ee 2013, Tusaha Qiimaha libsadaha (CPI) ee Koonfurta ayaa sare u kacay sagaal boqolkiiiba oo ayna ugu wakan tahay qiiimaha badarka/haruurka oo kordhay, kaasoo ah badeecad muhiim ah ee qiiimaha nolosha ugu yar. Is barbar-dhig ahaan, Tusaha Qiimaha libsadaha (CPI) ee suuqyada kale ee dalka ayaa ahaa mid xasilloon. Hase yeeshi, Tusaha Qiimaha libsadaha ee sanaddii la soo dhaafay ayaa waxoogaa hoos u dhacsan (5%) dhamaan dalka.

## NAFAQADA


Xogta Caafimaad (HIS) ayaa muujinaya in nafaqo-darri heerarkeedu gaarsiisan yihiin heerar Daran ilaa kuwo Ba'an ay ka jiri doonaan inta badan Soomaaliya inta u dhaxaysa bilaha 10aad ilaa 12aad ee 2013. Xaaladaha nafaqo-darri ee hab-nololeedka Caddun ee Bartamaha ayaa la filayaa inay sii xumaato, halka hab-nololeedka Goliska Waqooyi iyo barakacayaasha Baydhaba (IDPs) la filayo inay muujiyaan waxoogaa horumar ah. Xaaladaha nafaqo ee meelo ka mid ah Koonfurta-Bartamaha ayaa sidoo kale la filayaa inay sii xumaadaan ka dib ka bixiddii hay'adda MSF ay dalka ka baxday dhowr bilood ka hor sababo nabadjelyo awgood.

Dhanka Waqooyiga-Galbeed, xaaladaha nafaqo ee hab-nololeedyada Hawdka, Goliska Bari, Goliska Galbeed, Dooxada Nugaal iyo Soolka ayaa la filayaa inay heerkoodii Darnaa ay sii ahaadaan halka heer nafaqo-darri oo Walaac leh laga filayo hab-nololeedyada beero-xoolo dhaqatada Waqooyi-Galbeed inta u dhaxaysa bilaha 10aad iyo 12aad ee 2013. Xaaladah xasillon ee nafaqo ee ka jira Waqooyi-Galbeed ayaa inta badan la xiriira helitaanka cunno oo wanaagsanaaday, gaar ahaan caanaha ka dib soo-saarka xoolaha oo wanaagsanaaday iyo awoodda wax-iibsi oo xoogowday. Taa waxa sii dheer, xogaha laga helayo gudaha dalka oo muujinaya in aysan jirin cudurro ku soo kordhay gobolka Waqooyi-Galbeed, halka tallaalka cudur ay fulinayso Wasaaradda Caafimaadka oo kaashanaysa Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO) iyo bah-wadaagyo caafimaad oo kale oo sii socda. Horumar dhanka caawimaadda ee hay'adaha bani'adminimo ee ka hawl-gala Waqooyi-Galbeed ayaa noqonaya sababo wax-ku-ool ah oo ka hor-tegaya inay xaaladaha nafaqo-darri sii xumaadaan.

Muuqaallo isku dhafan oo muujinaya xaalado nafaqi-darro oo Xassiloon amaba sii hagaageysa oo ka jira hab-nololeedyada Waqooyi-Bari ayaa la filayaa inay ka jiraan Hawdka, Nugaal, Sool, Deex-xeebeedka iyo Bariga Golis oo ay u sabab yihiin cunno helidda oo horumartay, khaasatan caanaha. Dhanka gobollada Dhexe, xaalad nafaqo darro Ba'an ayaa laga yaabaa inay ku dhacdo hab-nololeedka Deex-Xeebeedka. Bishii 8aad ayaa cudurka duumada oo la xaqiijiyay uu ahaa sababta koowaad ee faafka cudurrada ayadoo 53 boqolkiiiba xaaladahaasi laga soo sheegay Bartamaha, halka 47 boqolkiihana laga soo sheegay koonfurta Soomaaliya. Cudurka jadeecada ee la tuhmayo ayaa kordhay 53 boqolkiiiba tan iyo bishii 7aad ee 2013, ayadoo 231 xaaladood la soo sheegay bishii 8aad ee 2013. Ku dhowaad 80 boqolkiiba ee dadkan ayaa ah caruurga ka yar da'da 5-ta sano.<sup>[1]</sup> [1]. Dhanka Koonfurta Soomaaliya, xaaladaha nafaqo ee hab-nololeedyada daaqsatada iyo webileyda ee waqooyiga Gedo ayaa

<sup>1</sup> [1] Warsidaha Bahda Caafimaad ee Soomaaliyeed, Bisha 8aad ee 2013

Jaantuska 4: Taxanaha Billaha ah ee Tusaha Qiimaha libsadaha (CPI)



Hooyo ay Wehliyaan Walaaladeed oo Nafaqo daran ee Xuddur , FSNAU, 2013

la filayaa inuu sii ahaadaan heerkoodii Ba'naa ee xilligii Guga 2013 dabadii, halka xaaladda nafaqo ee daaqsatada iyo webileyda koonfurta Gedo ay u muuqato inay sii ahaan doonto heir Aad u Ba'an. Xaalado nafaqo-darri Daran oo hore uga dhex taagnayd bulshada daaqsatada iyo beero-xolo dhaqatada Jubbooyinka iyo heerar nafaqo darri Ba'an oo ka dhex jiray bulshada webilayda ayaa la filayaa inay sii socdaan oo ayna ugu wacan tahay taageerada bani'aadminimo oo yar. Heerkoo nafaqo-darri ee Aadka u Ba'naa ka dhex jiray bulshada daaqstada Bakool iyo beero-xolo dhaqatada gobolka Baay xilligii Guga 2013 ayaa la filayaa inay sidooda ahaadaan tan iyo bisha 12aad ee 2013. Wax isbaddal ahayaan laga filanayn xaaladaha nafaqo ee barakacayaasha Kismaayo (Ba'an) iyo sidoo kale barakacayaasha Dhoobley (Aad u Ba'an). Horumar dhanka nafaqo ee barakacayaasha Baydhaba ayaa la odorasayaa, waa haddii aan la soo sheegin wax cudurro ah oo soo kordha.

## FALANAYNTA SUGNAANTA CUNNO EE BAAHSAN


### MAGAALOOYINKA

Falanqayntii Guga 2013 dabadii (bilaha 7aad-12aad), tiro lagu qiyasay 775 000 oo qof oo ku nool magaalooyinka Soomaaliya ayaa lagu asteeyey inay ku sugar yihiin xaalad Walaac (Wejiga 2aad ee IPC). Boqolkii 57 oo dadkaasi ka mid ah ayaa ku sugar Koonfurta, halka kuwa kalena ay ku sugar yihiin gobollada Waqooyiga (37%) iyo Bartamaha (6%). Taa waxa sii dheer in qiyastii 45 000 oo qof ay ku jiraan xaalad Daran (Wejiga 3aad ee IPC) [Bari - 30 000, Jubbada Hoose - 10 000 iyo Hiiraan 5 000]. Saadaasha sugnaanta cunno ayaa ku salaysan malo in nolol-maalmeedku uu ahaanayo mid xassiloon amaba hoos uu u dhacayo iyo awoddha wax-iibsi ee dadka magaalooyinka oo xooggan bilaha 8aad-12aad 2013. Xaaladaha sugnaanta cunno ee inta badan goobaha barakacayaasha ayaa lagu asteeyay heir Daran (Wejiga 3aad ee IPC), marka laga reebo Dhuusamareeb iyo Dhoobley, kuwaasoo lagu asteeyay xaalad Bani'aadminimo (Wejiga 4aad ee IPC). Barakacayaasha ayaa gaaraya 72 boqolkii tirada guud ee 870 000-ka qof ee ku sugar dhamaan Soomaaliya kuwasoo la saadaaliyay inay ku sugnaan doonaan xaalado Daran iyo kuwo Bani'aadminimo inta u dhaxaysa bilaha 8aad-12aad ee 2013.


Falanqyan lagu sameeyey isbaddalada dhacayay saddexdii bilood ee la soo dhaafay ayaa muujinaysa in Kharashka Nolosha ugu Yar (MEB) oo lagu qiimeeyey lacagta gudaha ee inta badan gobollada dalka uu yahay mid xassiloon. Wawaase la filayaa waxoogaa koror ah oo ka dhaca Shabeellada Hoose (12%), Jubbada Hoose (12%), Bakool (14%), Banaadir (15%) iyo Shabeellada Dhxe (21%) arrimahaasoo ay sababayaan koror xilliyeedka qimaha firilayda. Marka loo eego bishan bisheedii ee kal hore (2012), kharashka MEB-ga ayaa ahaa mid 3-12 boqolkiiha hooseeya inta badan gobollada, laakiinse waxoogaa ayuu ku sarreeyey (3-11%) gobollada Bari, Sanaag, Sool, W/Galbeed, Jubbada Hoose, Banaadir iyo Shabeellada Dhxe. Hoos u dhaca qimaha nolosha ee laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay ayaa waxa u sabab ah qimaha cunnada maxalliga iyo tan la soo dhaafsho oo hoos u dhacsanaa.

Intii lagu guda jiray bilihii 7aad-8aad, awoddha wax iibsi, ee lagu helo ama lagu ogaado Is-weydaarsiga Badeecadaha (ToT) ee u dhexxeeyaa mushahaar hawl-maalmeedka iyo firilayda loogu isticmaal badan yahay ayaa muujiyay xaalado kala duwan. ToT-ga ayaa hoos u dhacay 1-5 kgs inta badan suuqyada laakiinse xasilloonaa amaba kordhay (1-3 kgs oo firilay lagu baddalanayo hal mushahaar hawl maalmeed) marka la eego Shabeellada Hoose, Jubbada Hoose, Banaadir iyo dhowr suuqood oo ka tirsan gobollada Waqooyiga. Koror xad dhaaf ah oo ToT-ga ka dhexxeeyaa mushahaar maalmeedka iyo gallayda/arabikhida (oo kordhay 12-16 kgs) ayaa lagu arkay magaalooyinka Bu'aale iyo Jamaame ee gobollada Jubbooyinka. Kororkaasi ayaa waxa keenay qimaha gallayda/arabikhida oo aad oo hooseeya ayna sababeen dalag-goosi xilliyeedka Guga iyo midka xilliga ka baxsan ee dhul-beereedka degmooyinka soo saara firileyda ee Bu'aale iyo Jamaame ee ka tirsan gobollada Jubbooyinka. Is-weydaarsiga badeecadaha (ToT) ee inta badan gobollada Soomaaliya ayaa ka sarreeya siduu ahaa sanad ka hor (bisha 10aad '12) ugu waxan yihiin qimaha firilayda oo oo hooseeya (Jaantusyada 5 iyo 6).

**Jaantuska 5: Taxana Goboleedka Isweydaarsiga Ganacsiga ee mushqaayad Maalmeedka Iyo Badarka (Bartamaha iyo Waqooyi)**



**Jaantuska 6: Taxan Goboleedka Isweydaarsiga Ganacsiga ee Mushqaayad Maalmeedka Iyo Badarka (Koonfur)**



## REER MIYIGA

### Gobollada Waqooyiga

Falanqayntii bishii 7aad ee 2013, dhamaan hab-nololeedyada miyiga ee gobollada Waqooyi ayaa lagu asteeeyey xaalad Walaac (Wejiga 2aad ee IPC) xilligii ka dambeeyey Guga 2013 (bilaha 7aad-12aad). Malaha ugu muhiimsan ee lagu saleeyey astaytan ayaa waxa ka mid ahaa soo-saarka caanaha oo soo roonaaday, qimaha xoolaha iyo awoodda wax-iibsi ee reer miyiga ee xilliga odoroska.


Xaaladaha baad iyo biyo ayaa kala duwan una dhexeeyaa heer ku dhow heerarka caadiga ah iyo heerar wanaagsan ee inta badan goobaha Waqooyiga taasoo ka dhalaytay roobabkii Guga 2013 oo wanaagsan, xilliga Karanta oo baahsanaa iyo roobabka Deyrta oo hore u billowday bilaha 9aad -10aad, 2013. Dhaqnaanta xoolaha (geela, idhaa iyo riyaha) ee inta badan goobaha xolo-dhaqatada ayaa u dhexeeyey heer dhedhexaad iyo kuwo sarreeyaba. Dhalid xolaad oo heer dhexe ah ayaa jirta inta lagu gudo jiro xilliga Deyrta. Soo-saarka caanaha ee dhamaan noocyada xoolaha ayaa u dhexeeyaa kuwo heer dhexe ah amaba u dhow ayadoo xaaladdu ay yara hormaryso inta badan gobollada Waqooyiga. Tusaale ahaan, caanaha dhayda geela ee Waqooyiga-Bari iyo Waqooyiga Galbeed ayaa hoos u dhacday bishii 10aad 11 iyo lix boqolkiiba, siday u kala horreyaan, marka la bar-bar dhigo bishii ka horreysay. Wuxuu sidaa ka duwan Deex-xeebeedka gobolka Bari iyo galbeedka Guban ee Waqooyi-Galbeed halkaasoo soo-saarka caanaha uu welii hooseeyo in kastoo dhalidda geela ee la filayay inay billaabato dhamaadkii bishii 11aad ay u muuqato inay kordhiso helidda caanaha dhamaadka 2013-ka. Bishii 11aad 9-keedii 2013-ka, Duufaan ayaa ku dhufatay xeebta gobollada Waqooyi-Bari ee Soomaaliya, gaar ahaan dhulka u dhexeeyaa degmooyinka Eyl, Bayla iyo Dangorayo. Ilo kala duwan (xogaha gudaha dalka ee FSNAU, dowladda) ayaa muujinaya baaba' naf iyo xoolaba (ido iyo ryo) ka dib duufaanta. FSNAU ayaa waxay xaqijjin doontaa xaaladdani ka dib sahamada ho xilliga Deyrta ee la qaban doono dhamaadka bisha 12aad.

Roobabka Karanta ee wanaagsan ayaa la filayaa inay sababi doonaan soo-saar haruur/massago iyo gallay/arabikhi oo dhici doona Gu-ga/Karanta soo socda marka la bar-bar dhigo qiyaso hore. Dallag soo-saarka ayaa la filayaa inuu waxoogaa dib u yara dhaco, laga billaabo dhamaadka bisha 11aad, oo ay ugu wacan tahay billaabashada roobabka Karanta oo dib-yara dhacay iyo roobabkii Guga 2013 oo liitay. Beeralayda gobolka Togdheer ayaa billaabay inay beeraan dalagyadooda Massago iyo khudradba waxayna ka fii'iidi doonaan soo-saarka cawska. Is-weydaarsiga u dhexeeyaa riyaha iyo bariiska ayaa kordhay saddexdii bilood la soo dhaafay kana kordhay sanaddii hore (2012), ka dib waxoogaa koror ah oo ku yimi qimaha riyaha daabaxa dalabka xilliga Xajka oo sarreeyey iyo qimaha bariiska oo xasilloonaa amaba hoos u dhacay awadood. Qiimaha ugu sarreeya oo gaaraya 46 boqolkiiba ee Is-weydaarsiga riyaha/bariiska ayaa laga diiwaan geliyay suuq-xudduudeedka Togwajaale, kaasoo muujinaya dalabka ka imanaya Itoobiya iyo dhanka Soomaaliyaba (Jaantuska 7aad).

### Gobollada Dhexe


Xilligii Guga 2013 ka kadib (Bilihii 8aad-9aad, 2013, inta badan hab-nololeedyada miyiga ee gobollada dhexe ayaa lagu asteeeyey xaalad Dhibanaan IPC (Wejiga 2), marka laga reebo, Dhulka xeebta oo lagu asteeeyey xaaladda Ba'naan (IPC Wajiga 3), sababo la xiriira taranka xoolaha iyo iibkooda oo hagaagey roobabka Guga oo wanagsan dardeed. Xilligii Xagaa (Bilihii 7aad- 9aad, 2013) xaaladda daaqa iyo biyahaba hoos ayey u dhacday dhamaan habnololeedyada, tasoo aay ugu darneyd habnololeedka xeebaha halkaasoo roobabkii Guga aay ku liiteen. Hase yeshee, roobabkii Deyrta ee bisha 10aad 2013, ayaa hagaajiyey dhulka xeebaha iyo habnololeedyada kale ee Gobollada dhexe. Iminka, Qaabka guurgurka xooluhu waa caadi dhamaan habnololeedyayda. Xaaladda dhaqnaanta xoolaha ayaa si ballaaran u ah dhedhexaad inta badan Gobollada dhexe. Xogta ka immaaneysa dhulka ayaa caddeyneysa dhalid dhex dhexaad

**Jaantuska 7: Taxana Goboleedka Isweydaarsiga Ganacsiga ee Badarka iyo Rida (Waqooyiga)**



Masago si Wanaagsan u Baxday Gu/Karan, Awdal. FSNAU, Bishii 9aad, 2013

**Jaantuska 8: Taxana Goboleedka Isweydaarsiga Ganacsiga ee Badarka iyo Rida (Bartamaha)**



ah oo idaha iyo riyaha bilaha 9aad-10aad ayaa hajaajiyey oolidda caanaha. Sikastaba ha ahaatee, rimaya dhammaan noocyada xoolaha ayaa aad u hooseeyey xilligii Xagaaga iyo bilowga xilliga Deyrta. Ku bedelashada Ariga dabaaxa bariiska ayaa hagaagtey saddexdii bilood ee ugu dambeysay (8aad-10aad) inta badan suuqyada Gobollada Dhewe iyadoo kororkii ugu badanaa oo ah 35 boqokiiba lagu arkey Gaalkacyo. Hagaagidda isweydaarsiga ganacsiga waxaa loo sababeynayaas sicirka ariga dabaaxa ah oo kordhay, baahida Xajaka iyo ciidaha awigood iyo sicirka badarka oo hoos u dhacay. Waxaa taa ka duwan isweydaarsiga ganacsigao hoos u dhacay 22 boqokiiba demada Ceel-dheer sababo la xiriira amaandarrada iyo socoka jidaka oo xun xilliga roobka. Isweydaarsiga ganacsiga sanadlahaa ah ayaa isna caddeynaya koror ah 10 boqokiiba dhammaan suuqyada Gobollada Dhewe (Jantuuska 8).

#### **Gobollada Koonfureed**

Intii u dhexeysay bishii 8aad-12aad, 2013 xaaladda sugnaanta cuntada ee dhammaan habnololeedyada reer miyiga ee gobollada koonfureed ayaa lagu sifeeyey **Dhibbanaan** (IPC Wajiga 2) marka laga reebo Beer-xoolodhaqtada Hiiraan oo iyagu ku jira xaaladda **Ba'naan** (IPC Wajiga 3) iyo habnololeedka Xoolodhaqtada Koonfureed (geel dhaqtada) ee Jubada Hoose oo iyagu **Ladan** (IPC Wajiga 1). Saadaashu waxay ku saleysantahay roobab Deyr oo caadiga ku dhow, hawla Deyr beerashada oo caadi ah, keydka badarka ee qoysaska ku dhaqan dhulka wax laga beerto oo caadi ah, marka laga reebo Beer-xoolodhaqtada Hiiraan iyo waxsoosaarka xoolaha oo sii hagaagey ka dib markii dhowr xilliyoo isxigixa oo wanaagsan la helay. Iminka, keydka badarka waxa heysta oo ka mid ah qoysaska saboolka ee gobollada Shabellaha Hoose iyo Baay illaa sannadka 2013 dhamaadkiisa, halka keydka badarka ee saboolka gobollada Gedo iyo Juba laga yaabo inay dhammaadaan bartamaha bish 12aad 2013, macnaheeduna yahay keydkan ayaa dhammaanaya laba bilood ka badan sidii caadiga ahayd uguna wakan tahay waxsoosaarkii Guga iyo kii dib uga dhacay oo wanaagsan. Waxsoosaarka galleyd oo ka hooseeya sidii caadiga ahayd ay la laga filayaa gobollada soosaara galleyda ee Shabelle iyo Juba ka dib markii roobabkii Deyrta ay dib u dhaceen, waxyeellada daadadka iyo weliba sisin beerashada oo la kordhiyey (eeg Qeypta Beeraha). Sidoo kale, waxsoosaarka masagada ayaa loo badinayaa in ay ka hoos marto sidii caadiga ahayd ka dib markii loo qaatey in xaaladda beeraha ee Jubada Dhewe, Bakool, waqooyiga Gedo, Beer-xoolodhaqtada Hiiraan (gaar ahaan Beletwen) ay xuntayah. Laakiin, gobollada ugu soosaarka badan masagada ee Baay iyo Shabeelooyinka ayaa loo badinayaa in goostaan masago ku dhow sidii caadiga ahayd. Lagasoo billaaboo dabayaqaadii bishii 10aad 2013 illaa horraanti bishii 11aad 2013, ka dib markii roobab lixaad leh ay ka da'een qaybo ka mid Hiiraan (Jalalaqsi) iyo Gedo (Luuq), webiyada ayaa jabiyeey qararkii ka dibna ku fatahay dhul kooban oo webiyada agagaarkooda ah. Laakiin, khasaarahaa fatahaadda wuu yaryahay.


Saddedii bilood ee lasoo dhaafey (bishii 8aad-10, 2013), Tacab goosiga shaqada beeraha ayaa korortay deegaanada reer-webiga ee gobollada Shabellooyinka iyo weliba gobolka Baay ka dib markii baahidii beerashada xilliga Deyrta oo kordhay. Isweydaarsiga ganacsiga ee shaqada beeraha iyo badarka ayaa muujinaya kala duwanaan habnololeedyada beeraha ku tiirsan. Isweydaarsiga Ganacsi ee ugu sarreya (21kg) ayaa laga minguuriyey Baay iyo Jubada Dhewe, halka ka ugu hooseeya laga soo qoray Shabellaha Dhewe (6kg) [Jaantuska 9].

*Roobabkii Deyrta ayaa wanaajiyey xaaladda daaqa iyo biyaha, inkastoo meelialow aanay waruhu buuxsamin jiraan ka dib markii ay heleen roobab goosgoos ah. Xaalad dhexdhexaad ah oo dhaqnanta xoolaha (ASQ 3-4 dhibcood) ayaa lagusoo warbixiyey gobollada ideylkood marka laga reebo Gedo (ASQ 2 dhibcood). Oolitaanka caanaha ayaa ku dhow cadiga ama caadi ah ka dib markii ay lo'du dhalmadii billowdey bishii 8aad 2013 ariguna dhalmadii billaabay bishii 9aad 2013. Waxsoosaarka caanaha geela (geela irmaan) ayaa kordhay ka dib markii uu daaquo wanaagsanaaday ayadoo weliba la sugayo in geel kale dhalo bisha 11 2013 lio wixii ka dambeeyaa, oo sii wanaajin doona oolista iyo heista caanaha.*




Poor Camel Body Condition, Addun, Mudug. FSNAU, September 2013

#### **Jaantuska 9: Taxana Goboleedka Ariga Dabaaxa iyo Badarka (Koonfurta)**



Galley la Goostay Gu Dabadii, Reer-webiga Luuq-Gedo. FSNAU Bisha 9aad-10aad, 2013

## KHARIIDADA HABNOLOLEEDYADA SOOMAALIYA



### **Daabacaadyadii iyo Ogaysiisyadii Dhowaa iyo Kuwa so Dhow**

Xog-farsamodeedkii Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada Guga 2013 Dabadii Bisha 10aad 2013  
Falangeynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada Guga 2013 dabadii Bishii 10aad 2013  
FSNAU/FEWSNET Xogta Cimilada oo Dhameystiran, Bishii 10aad 2013  
FSNAU/FEWSNET Xogta Suuqyada oo Dhameystiran, Bisha 10aad 2013  
Warbixinta Kooban ee Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ee Afar-billaha Bishii 11aad 2013

*FIIRO: Daabacaadyadan iyo Ogeysiisyadan sare ku xusan waxaad ka heli kartaa shabakada FSNAU: [www.fsnau.org](http://www.fsnau.org)*

Technical and  
Managerial Support



Funding Agencies



Common  
Humanitarian Fund  
Somalia